

BAYAANKA MACLUUMAADKA TALLAALKA

SOMALI

Tallaallada Ugu Horreeya ee Ilmahaaga

Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

Many Vaccine Information Statements are available in Somali and other languages. See www.immunize.org/vis

Bayanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa Af-Soomaaliga iyo luqado kaleba. Eeg www.immunize.org/vis

Tallaalada looga hadlayo bayaankan ayaa ah kuwa ay u badan yihiin in la siiyo inta lagu jiro booqshooyinka isku midka ah ee ilmaha dhashay iyo horraanta carruurnimada. Tallaallada kale (kana midka yihiin Jadeecada, qaamo-qashiirta, iyo rubella;hargabka; cagaarshow A) ayaa waliba si joogta ah lagu talinayaa inta lagu jiro shanta sano ee ugu horeysa nololaha.

Ilmahaaga ayaa qaadan doonaa tallaalladan maanta:

- DTaP Hib Cagaarshow B Dabaysha PCV13

(Bixiyaha: Calaamadee sanduuqyada ku habboon.)

1 Waa maxay sababta la isu tallaalayo?

Cudurrada tallaalka lagaga-hortaggo aya badankood aad uga yar siday ahaan jireen, mahaddana waxaa iska leh tallaalka. Laakiin iyagu ma ay tagin. Cudurradan dillaacooda meelaha qaarkood ayaa wali ka jiraa Marykanka oo dhan. **Marka dhallaan intii ka hore ka yar la tallaalo, carruur intii hore ka badan ayaa bukoota.**

7 cudurro caruureed ah ayaa lagag hortagi karaa tallaallada:

1. Gawracatada ama Diphtheria (waa 'D' da ku jirta tallaalka DTaP)

- **Calaamadaha iyo astaamaha** waxa ka mid ah balqan culus oo ku dheehma gudaha dalqada cunaha oo markaa neefsashada dhib u keeni kara.
- **Gawracatadu waxay u horseedi kartaa** dhibaatooyin neefsasho, baaralaato, iyo wadnaha oo shaqadiisa gaba.
 - Qiyaastii 15,000 oo qof ayaa ku dhiman jirtay sannad kasta gawracatada Maraykanka gudihiiisa kahor intaan tallaalku jirin.

2. Teetano (Waa 'T' ku jirta tallaalka DTaP; oo waliba loo yaqaan Daan-qufulan)

- **Calaamadaha iyo astaamaha** waxa ka mid ah muruqaha oo giigsama, badiyaana ah dhammaan jirka oo idil.
- **Teetanada ayaa u horseedi karta** gowsaha oo qallafsanaada oo ay ku adkaato qofka inuu furo afka ama wax liqida.
 - Teetanaha ayaa dila qiyaastii 1 qof 10tii qof ee qaada.

3. Xiiqleyda (Waa 'P' da ku jirta tallaalka DTaP; oo waliba loo yaqaan Xiiqdheer)

- **Calaamadaha iyo astaamaha** waxaa ka mid riiraxyo iyo qufac aad u daran oo aan kala go' lahayn kaas oo ilmaha sebiga ah dhib uga dhiga in uu wax cuno, cabbo, ama neefsado. Riiraxyadan is-daba joogga ah ayaa haynaya toddobaadyo.
- **Xiiqleydu waxay u horseedi kartaa** of-wareen

(pneumonia), suuxdin, dhaawac maskaxiyo dhimasho. Xiiqleyda ayaa aad u halis galin karta dhallaanka.

- Ku dhimashada xiiqleydu inta ugu badan waa dhallaanka ka yar 3da bilood.

4. Hib (Hargabka Haemophilus nooca b)

- **Calaamadaha iyo astaamaha** waxa ka mid ah qandho, madax xanuun, qoor qallafsanaan, qufac, neef gaabasho. Waxa laga yaabaa in wax calaamado iyo astaamo ah uusan yeelan cudurku xaaladaha fudud.
- **Hib wuxuu u horseedi karaa** qoorgooyaha (infekshin ku dhaca maskaxda iyo waxa ku dahaaran xangulaha laf-dhabarta); oof-wareen; caabuuq gala dhagaha, dhiigga, isgoysyada xubnaha, lafaha, iyo dahaarka wadnaha; burbur maskax; dhuunta oo si xun u bararta, neefsiga oo adkaada, iyo dhegabeel.
 - Carruurta da'doodu ka yar tahay 5 sano ayaa halista ugu wayn u leh cudurka Hib.

5. Cagaarshow B

- **Calaamadaha iyo astaamaha** waxaa ka mid ah daal, shuban iyo matag, joonas ama indhacaseeye (maqaarka ama indhaha oo midabkoodu huruud noqdo), iyo xanuun ah murqaha, isgoysyada xubnaha iyo caloosha. Laakiin badiyaa maba jiraan wax calaamado ama astaamo ah.
- **Cagaarshow B wuxuu u horseedi karaa** beerka oo waxyeelo gaarto, iyo kansarka beerka. Dadka qaarkood ayuu cudurka cagaarshowga B ee joogta ah (muddo dheer) hadhow u ku dhacaa. Dadkani waxa laga yaabaa inayna u ekaan ama dareemin dad jirro qaba laakiin dadka wey qabadiin karaan cudurka.
 - Cagaarshowga B ayaa u horseedi kara wayellada beerka iyo kansar 1 ilmo ah marka loo eego 4ta carruurta ah ee u cudurku u qabto joogto ahaan.

6. Dabayl (Polio)

- **Calaamadaha iyo astaamaha** waxaa ka mid noqon kara jirro hargab oo kale ah, ama wax calaamado iyo astaamo ahba maba jirayaan.



U.S. Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention

- **Dabayshu waxay keeni kartaa** baralaato joogto ah (aan dhaqaajin karin dhudhun ama lug, ama mararka qaarkood aan neefsan karin) iyo dhimashaba.
 - Markay ahayd 1950yihii, dabaysha ayaa baaralaato ka dhigi jirtay 15,000 oo qof sannadkii gudaha Maraykanka.

7. Cudurka Oof-Wareenka (Pneumococcal)

- **Calaamadaha iyo astaamaha** waxaa ka mid ah qandho, qarqar ama qamandhaco, qufac, iyo laab ama xabad xanuun. Dhallaanka markay yihiin, calaamadaha ayaa waliba ay ka mid noqon karaan qoorgooye. suuxdin, iyo mararka qaarkood furuuruc.

- **Cudurka Pneumococcal wuxuu u horseedi karaa** goorgooye ama qoorgooye (infakshin ku dhaca maskaxda iyo waxa ku dahaaran xangulaha laf-dhabarta), caabuq gala dhegaha, dhiigga, oof-wareen, dhegabeel, iyo dhaawac maskax.
 - Qiyaastii 1 marka la eego 15kii carruur ah ee u qaada oof-wareenka qoorgooyaha (pneumococcal meningitis) ayaa ku dhiman doona infekshinka.

Carruurta ayaa badiyaa ka qaada cudurradan carruur kale ama dadka qaangaarka ah, oo cudurku inuu hayo xitaa aan ogaynba. Hooyada leh cagaarshowga B ayaa waliba qaadsiiin karta ilmaheeda markuu dhalanayo. Tetanaha ayaa jirka ka gala meel jeexan ama dhaawac ah; qof ka qof la iskuma gudbiyo.

Tallaallada ilmahaaga ka difaaca toddobadan cudur:

| Tallaalka | Tirada qiyaasaha | Da'aha lagu talinayo | Macluumaad Kale |
|---|------------------|--|--|
| DTaP (Gawracato, Teetano, Kixda ama Xiiq-Dheerta) | 5 | 2 bilood, 4 bilood, 6 bilood, 15-18 bilood, 4-6 sano | Carruurta qaarkood ayaa qaadta tallaalka loo yaqaan DT (diphtheria & tetanus) halkay ka qaadan lahaayeen DTaP. |
| Cagaarshow B | 3 | Dhalashada, 1-2 bilood, 6-18 bilood | |
| Dabayl (Polio) | 4 | 2 bilood, 4 bilood, 6-18 bilood, 4-6 sano | Qiyaas dheeraad ah oo tallaalka dabaysha ah ayaa laga yaabaa in lagu taliyo marka loo socdaalayo dalalka qaarkood. |
| Hib (<i>Hargabka Haemophilus nooca b</i>) | 3 ama 4 | 2 bilood, 4 bilood, (6 bilood), 12-15 bilood | Waxa jira dhowr tallaalka oo Hib. Markay tahay midkood ayaan qiyaasta 6da-bilood loo baahanayn. |
| Pneumococcal (PCV13) | 4 | 2 bilood, 4 bilood, 6 bilood, 12-15 bilood | Carruurta ka sii waawayn ee leh xaaladaha cudurrada qaarkood ayaa waliba u baahan tallaalkan. |

Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa laga yaabaa inuu kuu fidiyo qaar ka mid ah tallaalladan iyaga oo ah **tallaallo isku-jira**—dhowr tallaalka oo lagu bixiyo duritaanka isku mid ah. Tallaallada is-jirka ah ayaa ammaan ah oo wax-ku-ool u leh sida tallaallada kalida ah, taas micnaheedu waa ilmahaaga oo iraabtu ka yaraato.

2

Carruurta qaarkood ma aha inay qaataan tallaallada qaarkood

Carruurta inta ugu badan ayaa si badbaado leh u qaadan karta dhammaan tallaalladan. Laakin waxa jira arrimo ka reebban kuwaas:

- Ilmaha u hayo duray ama cudur kale oo sahlan maalinta tallaallada loo muddeeyay ayaa dhici karta in tallaalo. Ilmaha u buka si dhexdhexaad ah ama daran maalinta tallaallada ayaa laga yaabaa in la weyddiisto inay soo noqdaan maaalin kale.
- Ilmaha ku yeeshay xasaasiyad falcelin daran oo nolosha halis galisay ka dib qaadasho tallaalka ayaa ah inayna qaadan qiyaas tallaalka kale. ***U sheeg qofka bixinaya tallaallada haddii u ilmahaagu uu waligii yeeshay falcelin daran ka dib tallaalka kasta.***
- Ilmaha ku yeesha xasaasiyada daran (nafta halis galinaysa) walax ayaa ah inuuna qaadan tallaalka aya ku jirto walaxdaasi. ***U sheeg qofka bixinaya tallaallada ilmahaaga haddii u ilmahaagu u ku yeeshay falcelin daran oo aad ogtahay.***

La hadal dhakhtarkaaga kahor intuuna ilmahaagu qaadan:

- **Tallaalka DTaP**, haddii u ilmahaagu waligii ku yeeshay falcelinadan oo kale midkoodna kaddib qaadasho qiyaas DTaP hore:
 - Uu cudur kaga dhacay maskaxda ama habdhiska dareenka 7 maalmood gudahood,
 - Oohin aan kala go' lahayn 3 saac ama ka badan,
 - Qalal ama suuxitaan,
 - Qandho ka badan 105°F.
- **Tallaalka PCV13**, haddii u ilmahaagu u waligii ku yeeshay xasaasiyad daran ka dib markuu qaato qiyaas DTaP (ama tallaalka kale oo leh diphtheria toxoid), ama ka dib qaadashada qiyaas PCV7, tallaalka hore oo pneumococcal.

3

Halista Falcelinta Tallaalka

Dawo kasta, oo ay tallaalladu ka mid yihiin, waxa dhici karta inay jiraan saamayno soo raaca. Kuwaas ayaa ah badiyaa ah kuwo sahlan ama iyaga ayaa iskood isaga taga. Intooda ugu badan fal-celimaha ayaan darnayn: damqasho, guduudasho ama barar ah goobta duritaanla

laga siiyay; ama qandho hoose. Taasi waxay dhacdaa isla markaaba ka dib marka la duro oo waxay kaga baaba'aan hal ama laba maalmood gudahood. Waxay ku dhacdaa illaa qiyaastii nus ahaan, iyada oo ku xiran tallaalka.

Falcelin daran ayaa waliba suurtagal ah laakiin waa dhif.

Tallaallada Dabaysha, Cagaarshow B iyo Hibayaa lala xiriiriyay kaliya noocan falcelinta sahlan ah.

Tallaallada DTaP iyo Pneumococcal ayaa waliba lagu xiriiriyay dhibaatooyin kale:

Tallaalka DTaP

- **Dhibaatooyinka Aan Darnayn:** Dhirifsanaan (illaa 1 ilmo 3diiba); daal ama cunto rabitaanka oo xumaada (illaa 1 ilmo 10 kiiba); matag (illaa 1 ilmo 50kiiba); gacanta ama lugta dhan oo bararta muddo ah 1-7 maalmood (illaa 1 ilmo 30kiiba)—badanaaba ka dib qiyaasta tallaalka ee 4aad ama 5aad.
- **Dhibaatooyinka Dhexdhexaadka ah:** Qalal (1 ilmo 14,000 kiiba); oohin aan kala go' lahayn 3 saac ama ka badan (illaa 1 ilmo 1,000 kiiba); qandho ka badan 105°F (illaa 1 ilmo 16,000 kiiba).
- **Dhibaatooyinka daran:** Qalal muddo dheer jirta, kooma (suuxitaan aan laga soo kicin), miyir-qabka oo isdhima, waxaa kale oo laga warbixiyay dhaawac maskaxeed joogta ah kaddib tallaalka DTaP. Warbiximahan ayaa aad dhif u ah.

Tallaalka Oof-Wareenka (Pneumococcal)

- **Dhibaatooyinka Aan Darnayn:** Hurdood ama cunto rabitaanka oo xumaada heer ku meel-gaar ah (qiyaastii 1 ilmo markay yihiin 2 ama 3); dhirifsanaan (8 carruur ah markay tihiiin 10kiiba).
- **Dhibaatooyinka Dhexdhexaadka ah:** Qandho ka badan 102.2°F (ilaa 1 ilmo 20kiiba).

Ka dib tallaalkaan kasta:

Dawo kasta ayaa sababi karta falcelin xasaasiyadeed daran. Falcelintan oo kale ee ka timaad tallaalka ayaa aad dhif u ah, iyada oo lagu qiyaaso in ka yar 1 milyankii qiyaasoodba, oo waxay dhici doontaa dhowr daqiiqo illaa dhowr saacadood gudahood tallaalka kaddib.

Sida dawo kasta oo kale, ayay jirtaa calaf suurtagalkeedu aad u yar tahay oo tallaalku sababo dhaawac halis ah ama dhimashaba.

Waxa marwalba kormeer lagu hayaa badbaadada tallaallada. Macluumaad intaas dhaafsiisan intaas, booqo www.cdc.gov/vaccinesafety/

4

Maxaa dhacaya haddii ay waxyeello ka yimaaddiin?

Maxay tahay inaan raadiyo?

- U firso wixii kasta ee adiga kaa wewelsiiya, sida calaamadaha falcelinta xasaasiyadda daran, qandho aad u sarreysa, dabeecadda isbeddelaysa.

Calaamadaha falcelinta xasaasiyadda daran waxa ka mid ah xasaasiyad jidhka ah, wajiga iyo cunaha oo barara, neefta oo ku qabata. Dhallaanka, calaamadaha falcelinta xasaasiyadda ayaa noqon kara qandho,

DCH-1397SO AUTH: P. H. S., Act 42, Sect. 2126.

Translation provided by the Immunization Action Coalition

hurdood ama cunto rabitaanka oo xumaada. Carruurta sii waawayn calaamaduhu waxa ka mid noqon kara wadnaha oo degdeg u garaaca, dawakhaad, iyo tabcaanimo. Taasi waxay bilaabanta sida caadiga ah dhowr daqiiqo illaa dhowr saacadood kaddib tallaalka.

Maxay tahay inaan sameeyo?

- Haddii aad u maleyso inay tahay ficil-celinta xasaasiyadda daran am xaalad degdeg ah oo aan la sugin karin u wac 9-1-1 ama qofka gee isbitaalka kuugu dhow. Haddii kalese, wac dhakhtarkaaga.

Markaa, waxa ka dambeeya, ficil-celinta waa in warxbixin laga siiyaa Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (Vaccine Adverse Event Reporting System, VAERS). Dhakhtarkaaga ayaa ah inuu xareeyo warbixintan, ama adiga laftaada ayaa sidaas samayn kara adiga oo u mara websaytka VAERS ee ku taal www.vaers.hhs.gov, ama adiga oo waca **1-800-822-7967**.

VAERS ma bixiso talo caafimaad.

5

Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (The National Vaccine Injury Compensation Program)

Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (Vaccine Injury Compensation Program, VICP) waa barnaamij federaal ah oo loo abuuray magdhowga dadka laga yaabo ay wax yeelleeyeen tallaallada qaarkood.

Dadka rumaysan inuu tallaalka dhaawacay waxay wax ka ogaan karaan barnaamijka iyo sida loo xereysanayo cabasho iyaga oo waca **1-800-338-2382** ama booqda websaaydka VICP ee www.hrsa.gov/vaccinecompensation. Waxa jira wakhti xadaysan in la sheegto magdhow.

6

Sidee baan macluumaad intaas dhaafsiisan ku ogaan karaa?

- Weyddii daryeel bixiyahaaga caafimaad. Isaga ama iyada ayaa ku siin kara warqadda baakadda tallaalka lagu soo dhex riday ama kugula talin kara ilo kale oo aad macluumaad ka heli kartid.
- Wac waaxda caafimaadka xaafadda ama gobolkaaga.
- La xiriir Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (Centers for Disease Control and Prevention, CDC):
 - Wac **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)**
 - Booqo degelka CDC ee ku taal www.cdc.gov/vaccines ama www.cdc.gov/hepatitis

Vaccine Information Statement Multi Pediatric Vaccines

11/05/2015

Somali

42 U.S.C. § 300aa-26

Office Use
Only

